



Sahanka Ardayga ee 2019
WARQADDA MACLUUMAADKA WAALIDKA

Waalidiinta iyo Masuuliyiinta Qaaliga Ahow:

Guddiga Dugsiga Degmada Ottawa-Carleton (OCDSB) waxa uu leeyahay ka go`naansho xooggan ee sare u qaadidda helitaanka iyo fursadda dhamaan ardayda. Waxaanu aqoonsannahaybaahida loo qabo xog si si wanaagsan loogu fahmo ardadayada iyo sida loogu adeego.

OCDSB waxay samayn doonaan sahan arday inta u dhaxaysa **Noofambar 26eeda iyo Diisambar 13eeda, 2019**. Sahanku waxa uu u aruurin doonaa xog dhammaan ardayda laga soo bilaabo Rawdada ilaa Fasalka 12. Sahanka waxaa ku jira 2 nooc oo su'aalo ah:

- Su'aalaha **Dimugaraafiga** oo ku saabsan ashyaada sida sinjiga, tacriifta jinsiga, isirka, nooca luuqadda iyo jinsi; iyo
- Su'aalaha **Fahamka ah** oo ku saabsan dareenka ardayga ee badbaadada, lahaanshaha, kaqaybgalka, iyo badqabka.

Sahanku waa mid mutadawacnimo ah sirna ah. Sahanka waxaa dhammaystiri doona waalidiinta ardayda Rawdada ku jirta ilaa Fasalka 6 (hal sahan canugiiba). Ardayda ku jirta fasallada 7-12 waxa ay dhammaystiri doonaan sahan inta lagu guda jiro waqtiga fasalka. Sahanku waxa uu qaadan doonaa ku dhawaad 20 daqiiqo si loo dhammaystiro. Ka qaybqaatayaasha waxaa loo diri doonaa iimayl wata xiriir toos ugu xiran sahan waxayna ku dhammaystiri doonaan qaab elektoroonik ah. Nuqul warqad ah ayaa diyaar ah markasta oo la codsado.

Kaqaybqaadashadu waa mutadawacnimo. Waalidiinta ardayda ku jirta fasallada 7 ilaa 12 kuwaas oo AAN RABIN canuggooda in uu ka qaybqaato waa in ay dhammaystiraan soona [gudbiyaan foomkaan](#) marka la gaaro **Noofambar 15, 2019**. Waalidiinta ardayda ku jirta rawdada - 6aad kuwaasoo AAN DOONAYN in ay ka qaybqaataan way ka joogsan karaan dhammaystirka sahan.

Xogta sahan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu aqoonsado waxyaabaha kuwaasoo gacan ka gaysan kara in laga jawaabo su'aalaha ku saabsan:

- **Farqiga Gaaridda** – in kooxo gaara oo ardayda ah ay gaaraan heer isku mid ah;
- **Heerarka Joojinta iyo Eryidda** – in kooxo cayiman oo arday ah laga reebay ama la eryay heerka ugu badan;
- **Baahinta** – in kooxo cayiman oo arday ah si sare ama hoose loogu matalay barnaamij gaar ah ama baahinno (tusaale, waxbarasho marka loo eego koorsooyinka tadbiiqiga ah; Ingiriisi iyadoo Faransiisku muhiim yahay marka loo eego wax ku Barashada Faransiiska Aasaasiga ee dad aan u dhalan);
- **Dareen Lahaanshiyo** - in kooxo cayiman oo ardayda ah ay dareemayaan in ay aad ugu lug leeyihiin/luglahayn dugsiga;
- **Ku dareemid Amni Dugsiga** – in kooxo cayiman oo ardayda ah ay ku dareemayaan badbaado badan ama yar dugsiga.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sahan ayaa diyaar ku ah dukumiintigayaga su'aalaha iyo jawaabaha. Haddii aad qabtaan su'aalo kale ama aad raadinaysaan macluumaad dheeri ah fadlan bookho [websaytko OCDSB](#) iyo/ama websaytyadaa gaarka ah ee dugsiyada ama la xiriir Hoggaanka Cilmi-baarista iyo OCDSB kala xiriir mashruucaan - Sait Atas valuingvoices@ocdsb.ca ama 613-596-



OTTAWA-CARLETON
DISTRICT SCHOOL BOARD



8211 ext. 8571.

Waad ku mahadsan tahay caawintaada anakoo guda galayna shaqadaan muhiimka ah.
Si daacad ah,
Maamule